



Fayraska Eastern Equine Encephalitis (EEE)

Xaashida xaqiiqada



Fayraska Eastern Equine Encephalitis (EEE) waa cudur dhif iyo naadir ah balse halis ah kaasoo ku faafa qaniinyada kaneecada qabta cudurka.

Qof kasta ayaa qaadi kara fayraska EEE, balse dadka wakhtiga ku qaata guriga bannaankiisa ayaa halis sarreysa ugu jira. Fayraska EEE sidoo kale wuxuu ku dhici karaa fardaha, shimbiraha, iyo xayawaanka kale.

Astaamaha iyo Calaamadaha



Qandho ama Qarqaryo



Daciifnimo



Madax-xanuun



Jir iyo Murqo Xanuun



Maskaxda oo Bararta



Jahawareer



Curqida Luqunta



Kooma

Calaamadaha iyo astaamaha badanaa waxay bilaabmaan afar ilaa toban maalmood kadib marka ay dhacdo qaniinyada kaneecada cudurka qabta waxayna socdaan hal ilaa laba toddobaad. Waxaa suurtogal ah in dadka qaarkood ee uu ku dhaco fayraska EEE in aysan yeelan wax calaamado jirro ah. Calaamadaha iyo astaamaha fudud waxaa ka mid ah qandho iyo qarqaryo, daciifnimo, iyo jir iyo murqo xanuun.

Fayraska EEE wuxuu keeni karaa barar maskaxeed wuxuuna horseedi kartaa jirro aad u daran. Calaamadaha iyo astaamaha jirro ee daran waxaa ka mid ah qandho, madax-xanuun, barkindhac, jahawareer, qallal, iyo kooma/miyir-beel. Qiyaastii saddex meelood meel dadka qaada fayraska EEE way geeriyyodaan. Dadka ay da'doodu ka weyn tahay 50 jir iyo kuwa ka yar 15 sanno jir waxay halis ugu jiraan jirro daran.



La hadal dhakhtarkaaga haddii aad yeelato mid ka mid ah calaamadaahan ama astaamahan. Dhakhtarkaagu waxaa laga yaabaa inuu dhiig kaa qaado iyo dareere ku jira halka lafdhabarta iyo maskaxda iska galaan si uu u baaro fayraska EEE. Ma jirto daaweyn gaar ah oo loogu talagalay fayraska EEE. Jirrada daran ee laga qaado fayraska EEE ayaa sida caadiga ah u baahan taageero daaweyn oo lagu bixiyo gudaha isbitaalka.

Kahortagga Fayraska Eastern Equine Encephalitis

Sida ugu fiican ee looga hortagi karo fayraska EEE waa inaad iska ilaalisaa adiga iyo qoyskaaga inay kaneeco idin qaniinto.



Isticmaal sunta celisa cayayaanka ee ay EPA ansixiyeen ee maqaarka/jirka loogu talagalay sida:

- Sunta DEET
- Saliida Lemon Eucalyptus
- IR 3535
- Sunta Picaridin



Xiro shaar gacmo-dheer ah iyo surwaal lugo dheer markaad bannaanka joogto




Isticmaal kareemka iyo sunta cayayaanka ee dharka ee permethrin



Ka takhalus goobaha ay kaneecadu ugxanta ku dhali karto adigoo qallajinaya biyaha fadhiya ee ku jira bannaanka guriga

Biyaha fadhiya waa in la qallajiyo/miilo/nuugo ugu yaraan hal mar toddobaadkii. Kuwani waxaa ku jira baaldiyada, baaquliyada rabaayadaha, iyo baafafka shimbiraha. Sidoo kale waxaa dal dalolo u yeeli kartaa waxyaabaha ay ka midka yihii taayarada/sheeggaga iyo baaldiyada bannaanka looga tagay oo ay biyuhu fadhiistaan. Kahortagga dheeraadka ah waxaa ka mid ah iska ilaalinta imaanshaha bannaanka waaberiga iyo maqribka marka kaneecada ugu badani ay jirto iyo hagaajinta daloolada ku yaala albaabbada iyo muraayadaha daaqadaha.

Wixii xog dheeraad ah, Booqo:



1. www.maine.gov/dhhs/EEE
2. www.maine.gov/dhhs/mosquitofaq (Si aad uga hesho su'aalaha inta badan la isweydiyo ee kaneecada)
3. www.cdc.gov/EEE
4. www.epa.gov/insect-repelents/find-repelent-right-you (Si aad u ogato sunta celisa cayayaanka ee ay EPA ansixiyeen)

Waxaad sidoo kale ka wici kartaa Maine CDC nambarka 1-800-821-5821.